1. ***Waa maxay Pandemic EBT (P-EBT)?***

   Sharciga federaalka ayaa u fasaxaaya goballada inay dhaqangashaan barnaamij ku meel gaar ah oo loogu yeero Pandemic- Electronic Benefit Transfer (P-EBT), kaasoo siiya carruurta u qalma gunnooyinka Barnaamijka Dhamaystirka Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program ama SNAP, oo horay loo oran jiray food stamps). Ardayda fasalka barbaarinta (Pre-K) ilaa 12aad ee jooga dhismayaasha dugsiyada u qalma cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ee lagu baxsho National School Lunch Program (NSLP) ama School Breakfast Program (SBP) ayaa u qalmi kara gunnooyinka P-EBT. Barnaamijka waxa maamula Waaxda Ohio ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, waxayna Waaxdu wada shaqayn la leedahay Waaxda Waxbarashada ee Ohio (ODE) si ay u xaqiijiyaan in carruurta mutaysatay ay helaan dheefahan muhiimka ah.

2. ***Sidee ayuu dugsi ugu qalmayaa P-EBT?***

   Sabab la xariirta COVID iyo ugu yaraan 5 maalmood oo xariir ah, oo ay qasab noqotay in dugsiga la xiro, oo uu ku shaqaynaayay onlayn (waxbarashada fogaan araga), uuna shaqaynaayay saacadaha shaqada oo la yareeyay (ayna ku jiraan jadwallada isku dhafan) ama uu jiro ugu yaraan hal arday oo dugsiga kamid ah oo karantiil la gashay. Maalinta karantiilka waxaa lagu saleeyaa in saraakiisha dugsigu amraan in ilmo karantiil la gasho uuna guriga ku nagaado ayadoo lagu salaynaayo shuruudaha karantiilka ee dugsiga.

   Marka shuruudaha P-EBT ga dugsiga la buuxsho, dugsigu waa inuu eegaa suuragalnimada u qalmida arday kasta ee P-EBT.

   Fadlan ogoow dugsiyada qaarkood ayaa bilaabay dugsiga onlaynka lagu barto; hase yeeshee, maaha in dhammaan dugsiyada onlaynka ah ay buuxinayaan shuruudaha P-EBT sabab la xariirta inaysan siin NSLP ama SBP ardayda.

3. ***Sidee ayuu ardayga dugsigu ugu qalmayaa P-EBT haddii dugsigu u qalmo barnaamijka?***

   Cunug u qalma cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban oo ku sugan dugsiga ayaa heli kara gunnooyinka P-EBT maalmaha uu ka maqnaa dugsiga tooska loo tago sabab la xariirta in waxbarashada onlayn lagu siiyay ama uu karantiil ku jiray, ama uu dhigto dugsiga tooska loo tagaayo laakiin uusan helin cunto dugsiga lagu siin lahaa si uu ugu cuno dugsiga. Carruurtu uma qalmaan gunnooyinka P-EBT maalmaha ay dugsiga tooska u dhigtaan laguna siiyay cuntada dugsiga dhexdiisa.

4. ***Qaddar intee leeg ayuu heli doonaa ilmaha mutaystay?***

   Cunug kasta wuxuu heli doonaa **$7.10** (qiimaha la isku dhafay ee maalin kasta ee qarash

celinta federaalka oo lagu daboolaayo quraacda iyo qadada dugsiga sanad dugsiyeedka 2021-2022) maalin kasta oo cunugu uusan helin cuntada bilaashka ama qiimaha jaban sabab la xariirta in dugsigu xirnaa, uu ku shaqeeyo onlayn, uu ku shaqaynaayo imaatinka la yareeyay ama saacadaha ugu yaraan 5 maalmood oo xariir ah COVID-19 awgiis. Tan waxaa sidoo kale ku jira maalmaha cunugu uusan joogin dugsiga si toos ah sabab la xariirta inuu galaayo karantiil sabab la xariirta COVID-19. Maalmaha dhammaadka asbuuca, maalmaha fasaxa ama fasaxyada dugsiga laguma tirinaayo.

5. ***Sidee gunnooyinka P-EBT loo baxshaa?***

Haddii ilmuhu uu hadda qaato SNAP:

- Dheefaha P-EBT waxaa lagu shubi karaa xisaabta cunugu isticmaalo.
- Haddii aan ardayga la waafajin karin koontadiisa shaqaynaysa ee SNAP, waxaa laguu soo diri doonaa kaarka P-EBT oo magaca ilmahaagu ku yaalo.

Haddii ilmuhu uusan hadda qaadan SNAP:

- Haddii cunugu helay kaarka P-EBT lagasoo bilaabo Febaraayo 2021, gunnooyinka ayaa lagu shubi doonaa kaarkaas.
  Haddii aad u baahan tahay in kaarka laguu badalo fadlan wac 1-866-386-3071.
- Haddii aan cunugaagu helin kaarka P-EBT lagasoo bilaabo Febaraayo 2021, waxaad heli doontaa kaarka P-EBT oo horay loogu shubay lacagta gunnada oo boostada laguu soo dhigaayo.
  - Kaarku waxaa ku qornaan doona magaca ilmaha, laguma qoraayo magaca waalidka ama masuulka.
  - Tilmaamo ku saabsan sida looga shaqeysiiyo kaarka ayaa lasoo raacin doonaa (sidoo kale fiiri tilmaamaha hoose).
  - ***<u>Waxa waajib ah inaad haysato kaarkan maadaama aad u isticmaali doonto dheefaha P-EBT ee mustaqalka ee ilmahaagu mutaystay.</u>***

Cunug kasta wuxuu heli doonaa kaarka P-EBT; gunnooyinka ilmaha walaalaha ah ayaa lagu wada shubi doonin hal kaar.

Gunnooyinka waxaa loo isticmaalaa sida SNAP oo kale. Booqo https://www.fns.usda.gov/snap/eligible-food-items si aad u hesho liiska cunada lagu qaadan karo kaarkaan, halka aad ku gadan lahayd gunnooyinka SNAP.

6. ***Immisa jeer ayaa dheefaha loo bixiyaa?***

Haddii cunugaagu buuxsho shuruudaha P-EBT, gunnooyinka bilaha Agoosto, Sibteembar iyo Oktoobar ayaa la bixin doonaa dhammaadka Nofeembar. Kadib Nofeembar, gunnooyinka ayaa

la siin doonaa carruurta u qalma dhammaadka bisha taas ku xigta. Tusaale, gunnootinka Nofeembar ayaa la bixin doonaa dhammaadka Disembar.

Si loogu sahlo in dukaannada cuntada deegaanku kayd fiican helaan, gunnooyinka P-EBT ayaa hadda lagu bixin doonaa maalmo badan labada asbuuc ee ugu danbeeya bisha halkii maalinle loo bixin lahaa. Gunnooyinka cunugaaga ayaa la bixin doonaa maalin gaar ah ayadoo lagu salaynaayo xarafka koobaad ee magaciisa ugu danbeeya. Tusaale, magacyada ugu danbeeya ee ku biloowda A-D ayaa heli kara gunnooyinka 20^{ka} bisha, kadibna E-G ayaa heli doona 21da, iwm. Maalintaan ayaa kala duwanaan doonta bil kasta.

Fadlan ogoow, cunug kasta wuxuu heli doonaa gunnooyinka P-EBT isku maalin, laakiin cunug kasta wuxuu heli doonaa gunnooyinkiisa ***dhammaadka bisha.***

7. Miyey qoysasku dalban karaan dheefaha P-EBT?

Maya. P-EBT ma lahan codsi.

8. Muddo intee le'eg ayuu qoys uu heli karaa gunnooyinka P-EBT?

Gunnooyinka P-EBT waxaa la heli doonaa 12 bilood. Haddii kadib 12 bilood gunnooyinka P-EBT aan la isticmaalin, waa laga saari doonaa (la ceshan doonaa) koontada. Dadka hadda qaata SNAP ayaa wali heli doona gunnooyinka u hray ee SNAP.

9. Yay qoysku la xiriirayaan haddii ay su'aalo ka qabaan P-EBT?

Su'aalaha barnaamijka ee guud, su'aalaha la xiriira gunnooyinka ilmahaaga, fadlan wac khadka adeegga macmiilka P-EBT 1-866-244-0071 dookha 1.